



Qodobka 18aad. Xorriyadda Ra'yiga iyo Afkaarta

- (1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu yeesho, soo bandhigo ra'yigiisa iyo in uu doono, inuu helo oo gudbiyo ra'yigiisa, xog ama afkaar si kastaba.
- (2) Xorriyatu qoolka waxaa ka mid, xorriyadda hadalka, saxaafadda iyo wax walba oo soo gelaya warbaahinta elektaroonikada iyo internet-ka.
- (3) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu muujiyo hal'abuurkiisa faneed, xorriyaddii-sa aqooneed iyo xorriyadda cilmi-baarista.

Qodobka 19aad. Xurmada Hoyga

- (1) Qofna gurigiisa ama meeshii kale ee isaga u gaar ah lama geli karo, lama baari karo, lamana basaasi karo amar garsoore oo sababaysan la'aantiis.
- (2) Waxaa waajib ah in amarka garsooraha si toos ah loogu akhriyo degganaha hoyga, baarahana waxaa ka reeban ku xadgudubka sharciga

Qodobka 21aa. Xorriyadda Isu-socodka iyo Degitaanka

- (1) Qof kasta oo si sharci ah ku deggan dhulka Jamhuuriyaddu wuxuu xaq u leeyahay in uu si xor ah u degi karo, ugu dhex-socon karo meel kasta oo dalka ka mid ah, kana bixi karo.
- (2) Muwaaddin kasta wuxuu xaq u leeyahay soo-gelidda iyo joogitaanka waddanka iyo inuu helo Baasabboor

Qodobka 26aad. Hantida

- (1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu hanti yeesho, ku dhaqmo, ku naalloodo, iskana gado ama iska wareejiyo markuu doono.
- (2) Dawladdu waxay si qasab ah hanti ula wareegi kartaa marka ay jirto dan guud. Qof kasta oo hantidiisa dan guud awgeed loola wareegey wuxuu Dawladda xaq ugu leeyahay magdhaw caaddil ah oo lagu heshiiyey ama ay maxkamadi go'aamisey